

## **Habeenka dhaqanka ee Eskilstuna**

Habeenka dhaqanka waxaad goob joog u ahaan doontaa inaad aragto masraxiyad, muusig, qoob ka ciyaar, farshaxan iyo suugaan waxaadna ka qaybqaadan kartaa aktiifiteetyo iyo aqoon is-weydaarsiyo loogu talagalay da'aha dhammaantood. Dhammaan qaybaha barnaamijka ee Habeenka dhaqanka waa lacag la'aan.

Habeenka dhaqanku wuxuu soconayaa 15:00-23:00 oo uu ka soconayaa meelaha masraxiyada, suuqa, matxafyada iyo rugaha buuggaagta. Waxaad barnaamijka ka heli kartaa [eskilstunakulturnatt.se](http://eskilstunakulturnatt.se).

Habeen dhaqameedka waxaa soo qabanqaabinaya degmada Eskilstuna, waxaana samaynaya qof kasta oo raba inuu soo abaabulo barnaamij.